

Mabaadiida Hagida WIDA ee ku salaysan Hormarinta Luuqada



Mabaadii'daan hagaysa Hormarinta Luuqada iyo Waxbarashada ee la cusbooneysiiday ayaa tusaale guud u ah WIDA inay had iyo jeer Soo Bandhigi Karto Falsada Can Do Philosophy (Waa la samayn karaa).

1. Ardayda leh luuqadaha iyo dhaqamada kala duduwan waxay faa'iido qiimo leh u keenayaan nolasha waxbarashada iyo nolasha fasalka; isticmaalida waxyaabahaas muhiimka u ah iyo caqabadaha eexashada waxay gacan ka geystaan hormarinta madax banaanida ardayda barta luuqadaha badan sidoo kale waxay hay'adooda ku dhiirigeliyaan waxbarashada (Ciwaanka, Dam, iyo Legenhausen, 2017; Moll, Amanti, Neff, iyo González, 1992; Nieto iyo Bode, 2018; Perley, 2011).
2. Waxaa kor u kaca kobaca ardayda barta luuqadaha kala duduwan sida aqoontooda, aasaaska dhaqankooda, awoodaha cilmiyeed, iyo sida ay ugu hadlayaan luuqada (Arellano, Liu, Stoker, iyo Slama, 2018; Escamilla, Hopewell, Butvilofsky, Sparrow, Soltero-González, Ruiz-Figueroa, iyo Escamilla, 2013; Genesee, n.d.; Potowski, 2007).
3. Ardayda barta luuqadaha badan iyo waxbarashada hormarinta luuqada waxay yimaadaan waqti kadib marka ay ka qaybgalaan hawlo micno leh oo ka dhaca guryahooda, dugsiyadooda iyo xaafadooda (Engeström, 2009; Larsen-Freeman, 2018; van Lier, 2008; Wen, 2008).
4. Ardayda barta luuqadaha badan, dareenka bulshada, iyo hormarinta fahanka waxay helaan habab gacan ka geysta guusha ay ka gaaraan dugsiga iyo nolasha danbe (Aldana iyo Mayer, 2014; Barac iyo Bialystok, 2012; Gándara, 2015; Sánchez-López iyo Young, 2018).
5. Ardayda barta luuqadaha badan waxay isticmaalaan sidoo kalena hormariyaan luuqada marka ay helaan fursad shaqsiyadeed oo ay ku hormarinayaan, hab dhaqanka, awooda, iyo heerka luuqadooda (Gibbons, 2002; Swain, Kinnear, iyo Steinman, 2015; Ururka Caalamiga ah ee TESOL, 2018; Vygotsky, 1978).
6. Ardayda barta luuqadaha badan waxay isticmaalaan sidoo kalena hormariyaan hawlaha sida cad qaybta oga ah mawduucyada kala duduwan, oo ay kujiraan hadalka, qoraalada, muuqaalada, iyo xariirka ee dhaqdhaqaaqinta xubnaha (Choi iyo Yi, 2015; Jewitt, 2008; van Lier, 2006; Zwiers iyo Crawford, 2011).
7. Ardayda barta luuqadaha badan waxay isticmaalaan sidoo kalena hormariyaan turjumaada iyo helida macluumaadka, fikradaha, iyo ra'yiga ay ka helaan meelo badan oo kala duduwan, oo ay ka mid yihiin waxyaabaha nolasha dhabta ah ka turjumaaya, mawduucyada, soojeedinada, iyo qoraalada qaababka kala duduwan u qoran (Ajayl, 2009; Cope iyo Kalantzis, 2009; Jewitt, 2009; Kervin iyo Derewianka, 2011).
8. Ardayda barta luuqadaha badan waxay isticmaalaan habka garashada badan, waxayna bartaan kala duwanaanshaha luuqadaha, iyo wacyigelinta dhaqameed si ay u hormariyaan isticmaalida luuqada (Bialystok iyo Barac, 2012; Casey iyo Ridgeway-Gillis, 2011; Gottlieb iyo Castro, 2017; Jung, 2013).
9. Ardayda barta luuqadaha badan waxay luuqadooda si buuxda ugu adeegsadaan xirfadaha, oo ay kujiraan habka xariirka isku dhafka ah, si ay u hormariyaan luuqadooda iyo barashadooda (García, Johnson, iyo Seltzer, 2017; Hornberger iyo Link, 2012; Wei, 2018).
10. Ardayda barta luuqadaha badan waxay isticmaalaan ayna kobciyaan luuqada si ay ugu turjumaan una soo bandhigaan aragtiyo kala duduwan, sidoo kalena una sidaan xariirka wacyigelinta, iyo xaqiijinta aqoonsigooda (Cummins, 2001; Esteban-Guitart iyo Moll, 2014; May, 2013; Nieto, 2010).

Ardayda barta luuqadaha badan waxaa

loola jeedaa dhamaan caruurta iyo dhallinta sida joogtada ah u barta luuqadaha badan. Waxaa kamid ah ardayda loo yaqaano Bartayaasha Luuqada Ingiriisiga (ELLs) ama Bartayaasha Labo Luuqadood (DLLs); bartayaasha luuqada dhaxalk; ardayda ku hadla noocyada kala duduwan ee Ingiriisiga ama luuqada aasaasiga ah.



WIDATM

WIDA waxay ku dhex taalaa gudaha Xarunta Daraasada Waxbarashada Wisconsin ee Jaamacada Wisconsin-Madison.
© 2019 Guddiga Diiwaangelinta Nidaamka Jaamacada Wisconsin System, oo wakiilka ka ah WIDA